



## Xog ururinta Aragtida Dugsiga ay ka haystaan Waalidka/Daryeelbixiyaha 2023

Labadii sanno ee kastaba, Xog ururinta Aragtida Dugsiga laga haysto ayaa la sameeyaa taasoo qayb ka ah dadaalka aan ku bixinayno in dugsiyadu ahaadaan kuwo ammaan ah, loo dhanyahay, dadkana soo dhaweeya. Xog aruurintu waa mid qarsoon oo sir ah.

Waa muhiim in aan dhegaysanno aragtida waalidiinta, mas'uuliyiinta iyo daryeel bixiyeyaasha taasoo ku saabsan dhaqanka dugsiga. Waxa aan ka baranno mar kasta oo aan xog ururinta samayno ayaa noo sheegaya xaaladda bulshooyinkeenna dugsiga ay ku sugan yihiin, si wax kabadalada muhiimka u ah horumarinta jawiga waxbarashada loo sameeyo.

Waalidiinta, mas'uuliyiinta iyo daryeel bixiyeyaashu waxay xog ururinta qarsoodiga ah buuxin karaan inta u dhexaysa **Maarso 1deeda iyo Maarso 24keeda**. Xogta aan ururino waxay naga caawinaysaa in aan fahamno intee inleega ayaa ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska ay u arkayaan in dugsiyadu sare u qaadayo jawi waxbarasho oo ammaan ah loona dhanyahay oo habdhaqan wanaagsan.

Waad ka gudbi kartaa su'aal kasta oo aadan doonayn in aad ka jawaabto. Haddii aad leedahay caruur badan oo dhigata OCDSB, fadlan buuxi xog ururinta dhowr jeer (adigoo ubuuxinaya canuggiiba hal mid).

Marka laga tago in ay gacan ka gaysanayso sare u qaadidda waxyaabaha ay ardaydeenna iyo qoysasku kala kulmaan dugsiga, buuxinta xog ururinta aragtida dugsiga laga haysto ee ay guddiyada maamulada dugsiyadu samaynayaan labadii sannaba hal mar waxaa uga baahan Wasaaradda Waxbarashada.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah iyo/ama walaacyo ah oo ku saabsan xog ururinta, fadlan la xiriiir [schoolclimatesurvey@ocdsb.ca](mailto:schoolclimatesurvey@ocdsb.ca)

Waad ku mahadsan tahay wakhtigaaga!

Q2 Buuxi xog ururintan adiga oo maskaxda ku haya hal dugsi iyo hal canug.

Haddii aad leedahay caruur hal canug ka badan, kusoo dhawow in aad buuxiso xog ururinta caruurta kale mar labaad.

Q3 Fdlan ka dooro dugsiiga canuggaaga liiska hoose. Magacyada dugsiyada waxaa loo soo kala hormariyay qaab alifbeeto ahaan ah. **\*su'aashanu waa mihiim inaad ka jawaabto.**

- A. Lorne Cassidy Elementary School
- Adrienne Clarkson Elementary School
- Adult High School
- Agincourt Road Public School
- Alta Vista Public School
- Arch Street Public School
- Avalon Public School
- A.Y. Jackson Secondary School
- Barrhaven Public School
- Bayshore Public School
- Bayview Public School
- Bell High School
- Bells Corners Public School
- Berrigan Elementary School
- Blossom Park Public School
- Briargreen Public School
- Bridlewood Community Elementary School
- Broadview Avenue Public School
- Brookfield High School
- Cairine Wilson Secondary School
- Cambridge Street Community Public School
- Canterbury High School
- Carleton Heights Public School

- Carson Grove Elementary School
- Castlefrank Elementary School
- Castor Valley Elementary School
- Cedarview Middle School
- Centennial Public School
- Chapman Mills Public School
- Charles H. Hulse Public School
- Churchill Alternative School
- Clifford Bowey Public School
- Colonel By Secondary School
- Connaught Public School
- Convent Glen Elementary School
- Crystal Bay Centre for Special Education
- D. Roy Kennedy Public School
- Devonshire Community Public School
- Dunlop Public School
- Dunning-Foubert Elementary School
- Earl of March Secondary School
- Elgin Street Public School
- Elizabeth Wyn Wood Alternate High School Program
- Elmdale Public School
- Emily Carr Middle School
- Fallingbrook Community Elementary School
- Farley Mowat Public School
- Featherston Drive Public School
- Fielding Drive Public School
- First Avenue Public School

- Fisher Park Public School/Summit Alternative School
- Forest Valley Elementary School
- Frederick Banting Secondary Alternate Program
- General Vanier Public School
- Glashan Public School
- Glebe Collegiate Institute
- Glen Cairn Public School
- Glen Ogilvie Public School
- Gloucester High School
- Goulbourn Middle School
- Greely Elementary School
- Half Moon Bay Public School
- Hawthorne Public School
- Henry Larsen Elementary School
- Henry Munro Middle School
- Heritage Public School
- Hillcrest High School
- Hilson Avenue Public School
- Hopewell Avenue Public School
- Huntley Centennial Public School
- Jack Donohue Public School
- Jockvale Elementary School
- John McCrae Secondary School
- John Young Elementary School
- Kanata Highlands Public School
- Kars on the Rideau Public School
- Katimavik Elementary School

- Knoxdale Public School
- Lady Evelyn Alternative School
- Lakeview Public School
- Launch Secondary School
- Le Phare Elementary School
- Lisgar Collegiate Institute
- Longfields-Davidson Heights Secondary School
- Manor Park Public School
- Manordale Public School
- Manotick Public School
- Maple Ridge Elementary School
- Mary Honeywell Elementary School
- Meadowlands Public School
- Merivale High School
- Metcalfe Public School
- Mutchmor Public School
- Nepean High School
- Norman Johnston Secondary Alternate Program
- North Gower/Marlborough Public School
- OCV Elementary
- OCV Secondary
- Orleans Woods Elementary School
- Osgoode Public School
- Osgoode Township High School
- Ottawa Technical Secondary School
- Pinecrest Public School
- Pleasant Park Public School

- Queen Elizabeth Public School
- Queen Mary Street Public School
- Regina Street Alternative School
- Richard Pfaff Secondary Alternate Program
- Richmond Public School
- Ridgemont High School
- Riverview Alternative School
- Robert Bateman Public School
- Robert E. Wilson Public School
- Robert Hopkins Public School
- Roberta Bondar Public School
- Roch Carrier Elementary School
- Rockcliffe Park Public School
- Roland Michener Public School
- Sawmill Creek Elementary School
- Severn Avenue Public School
- Shingwàkons Public School
- Sir Guy Carleton Secondary School
- Sir Robert Borden High School
- Sir Wilfred Laurier Secondary School
- Sir Winston Churchill Public School
- South Carleton High School
- South March Public School
- Stephen Leacock Public School
- Steve MacLean Public School
- Stittsville Public School
- Stonecrest Elementary School

- Summerside Public School
- Terry Fox Elementary School
- Trillium Elementary School
- Urban Aboriginal Alternate Program
- Vimy Ridge Public School
- Vincent Massey Public School
- Viscount Alexander Public School
- W. Erskine Johnston Public School
- W.E. Gowling Public School
- W.O. Mitchell Elementary School
- West Carleton Secondary School
- Westwind Public School
- Woodroffe Avenue Public School
- Woodroffe High School
- York Street Public School

Q4 Waa maxay fasalka canuggaagu? \*Su'aashaanu waa mihiim inaad ka jawaabto.

- Sannadka 1aad ee Xanaanada Caruurta (Xanaanada Caruurta Hoose)
- Sannadka 2aad ee Xanaanada Caruurta (Xanaanada Caruurta Sare)
- Fasalka 1aad
- Fasalka 2aad
- Fasalka 3aad
- Fasalka 4aad
- Fasalka 5aad
- Fasalka 6aad
- Fasalka 7aad
- Fasalka 8aad
- Fasalka 9aad
- Fasalka 10aad
- Fasalka 11aad
- Fasalka 12aad
- Mid kale (fadlan qeex)\_\_\_\_\_

Q5 Waa maxay barnaamijka canuggaagu ku jiro?

- English/Core French
- French Immersion
- Specialized Special Education
- Mid kale (fadlan qeex)\_\_\_\_\_



Q6 Canuggaagu ma leeyahay Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (IEP)?

- Haa
- Maya
- Ma hubo

Q7 Ingiriisigu ma yahay luuqadda koowaad ee canuggaaga?

- Haa
- Maya
- Ma hubo

Q8 Su'aalaha ku jira qaybta soo socota waxay ku saabsanyihiin canugaaga ama waxyaabaha uu kala kulmo canuggaagu dugsiga.

**Ka qaybgalka: Dareenka Inuu Qayb ka Yahay iyo Ku Xirnaanshiyaha Bulshada Dugsiga**

Q9 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Canuggayga si naxariis leh ayay ardayda kale dugsiga dhigataa ula dhaqmaan.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Canuggayga waxay ardayda kale ee dugsiga dhigataa ula dhaqmaan qaab sharaf iyo ixtiraam leh.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Canuggaygu wuxuu dareemayaa in uu dugsiga qayb ka yahay.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Canuggaygu wuxuu dareemayaa inay aqbaleen ardayda kale ee dugsiga dhigata.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
e. Canuggaygu wuxuu dareemayaa inuu qayb ka yahay bulshada dugsiga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
f. Canuggaygu wuxuu dugsiga ku leeyahay saaxiibo uu aamini karo kalana hadli karo dhibaatooyinkiisa.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
g. Canuggaygu wuxuu dugsiga ku leeyahay saaxiibo taageera sidoo kalena daryeela.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
h. Canuggaygu wuxuu awoodaa in uu si fudud saaxiibo ugu yeesho dugsiga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Ka qaybgalka: Xiriirka Ardayda kala dhexeeya Dadka waaweyn ee Dugsiga jooga**

Q10 Ardaydu waxay inta badan xiriir la samaystaan macalimiintooda iyo dadka kale ee waaweyn ee dugsiga jooga. “Dadka kale ee waaweyn” waxaa kamid noqon kara shaqaalaha kaalmada waxbarashada (LSTs, ECEs, EA’s), shaqaalaha maamulka (sida, maamulaha, Maamule Kuxigeenka/Kuxigeenada, maamulada xaafiisyada), iwm.

Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Macalimiinta iyo dadka kale ee waaweyn ee ka shaqeeya dugsiga canuggaygu waa ay daryeelaan canuggayga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Macalimiinta iyo dadka kale ee waaweyn ee ka shaqeeya dugsiga canuggaygu waxay canuggayga ula dhaqmaan si sharaf iyo ixtiraam leh.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Macalimiinta iyo dadka kale ee waaweyn ee ka shaqeeya dugsiga canuggaygu waa ay dhagaystaan fikradda canuggayga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Macalimiinta iyo dadka kale ee waaweyn ee ka shaqeeya dugsiga canuggaygu si cadaalad ah ayay ula dhaqmaan canuggayga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
e. Macalimiinta dugsiga canuggaygu waxay ka tixgelin gaar ah siiyaan baahiyaha, awoodaha, iyo waxyaabaha canuggaygu danaynayo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
f. Canuggaygu wuxuu dareemayaa inay aqbaleen shaqaalaha iyo dadka waaweyn ee dugsiga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
g. Canuggaygu wuxuu haystaa ugu yaraan hal qof oo weyn oo uu ka raadsan karo kaalmo, talo, ama taageero.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
h. Canuggaygu wax dhib ah kuma hayso in uu weydiyo macalinkiisa ama qof kale oo weyn in uu ka caawiyo layliska dugsiga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
i. Macalimiinta Canuggaygu waa kuwo diyaar u ah marka canuggaygu u baahdo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Ka qaybgalka: Tuujinta Maskaxda**

Q11 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Dugsigu muhiim ayuu u yahay canuggayga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Canuggaygu wuxuu jecelyahay caqabadaha uu ka waajaho barashada waxyaabaha cusub ee dugsiga lagu barto.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Canuggaygu wuu jecel yahay waxqabdyada dugsiga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Canuggaygu wuxuu ku dadaalaa in uu darajooyin fiican ka keeno dugsiga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Ka qaybgalka: Waxqabadyada Manhajka ka baxsan**

Q12 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Waxaa jira fursado fara badan oo canuggaygu kaga qaybgali karo cayaaraha, naadiyada, iyo howlaha kale ee dugsiga ee fasalka ka baxsan.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Canuggayga waxaa lagu dhiirigaliyaa in uu ka qaybqaato waxqabadyada manhajka ka baxsan.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Deegaanka: Akhlaaqda Dugsiga**

Q13 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Shuruucda dugsigu waa kuwo cadaalad ah.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Shuruucda dugsiga waxaa loo dhaqangaliyaa si u siman (ama cadaalad ah) dhammaan ardayda.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Natiijooyinka ka dhalanaya jabinta shuruucdu waa kuwo cadaalad ah.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Habdhaqanka ardayda si wanaagsan ayaa loogu toosiyaa dugsigan.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Deegaanka: Deegaanka Waxbarashada**

Q14 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Macalimiintu waa kuwo jecel kuna wanaagsan waxbaridda iyo waxbarashada ardayda.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Macalimiintu waxay canuggayga siiyaan kaalmada gaarka ah iyo daryeelka uu u baahan yahay.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Macalimiintu waxay aad ugu raja weyn yihiin in canuggaygu guulaysanayo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Baahiyaha waxbarashada ee canuggayga waa ay daboolaan macalimiinta ama bareyaashu.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
e. Canuggaygu wuxuu helaa mid lamid ah fursadaha waxbarashada tayada leh ee ay helaan ardayda kale.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
f. Macalimiintu waxay canuggayga ku dhiirgaliyaan in uu shaqadiisa sida ugu wanaagsan u qabto.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Deegaanka: Matalaadda**

Q15 Dugsiga canuggayga, waxaan dareemayaa in asal ahaan iyo isir ahaanba halka cunuggaygu kasoo jeedo si wanaagsan loo muujiyo:

	Aad ayaan uga soo horjeeda a	Waan kasoo horjeeda a	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsana hay	Aad ayaan ugu raacsana hay	Ma hubo
a. Sawirro, boodhadh, iyo muuqaallo dugsiga ku yaal	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Qalabka macalimiintu ku isticmaalaan fasalka (tusaale ahaan., buugaag, fiidyow / filimo)	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Casharo ama macluumaadka manhajka	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Waxqabadyada manhajka ka baxsan (tusaale ahaan., cayaaraha, naadiyada, waxqabadyada fanka la xiriira)	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
e. Dhacdooyinka idugsiga/waxqabadyada (tusaale ahaan., waxqabadyada manhajka ka baxsan, xafladaha dhaqanka, diinta/caqiidada/waxqabadyada qowmiyadeed)	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
f. Bareyaasha (sida, macalimiinta, EAs, ECEs, LSTs, maamule kuxigeenka/kuxigeenada, maamulaha, iwm.)	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Deegaanka: Aqoonsiga**

Q16 *Aqoonsigu* wuxuu usamayn karaa micno kala duwan dadka kala duwan, laakiin sida fudud aqoonsiga waxaa loola jeedaa qaabka aan isu aragno ee dunida. Aqoonsigu wuxuu noqon karaa mid fara badan oo balaaran, waxaana kamid ah sida magacyadeenna, da'da, aqoonsiga jinsiga, dhaqanka ama aqoonsiga, waxyaabaha ku saabsan muuqaalkeenna jireed (sida, midabka timaha, midabka maqaarka, isirka. iwm.), waxyaabaha ku saabsan cidda aan nahay (sida, diinta, shakhsiyad, waxyaabaha aan danaynayso, hiwaayaadka, iwm), iyo waaya aragnimadeena iyo xiriirada aanu la leenahay dadka kale.

Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeeda	Waan kasoo horjeeda	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsana hay	Aad ayaan ugu raacsana hay	Ma hubo
a. Qaabka uu uqoonsado cunuggaygu naftiisa waxaa laga soo dhaweeyaa dugsiga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Canuggaygu wuxuu fursad u haystaa in uu muujiyo qaabka uu u qoonsado naftiisa.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Canuggaygu wuxuu fursado u haystaa in uu wax ka barto asalkiisa iyo qaabka uu naftiisa u aqoonsanaayo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Canuggaygu wuxuu fursado u haystaa in uu wax ka barto asalka iyo qaababka dadka kale u aqoonsadaan nafhooda.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Ammaan: Dareemidda Ammaan**

Q17 Sidee ayuu canuggaagu ammaan ugu dareemayaa dugsiga? *Dareemidda ammaan* micnaheedu waa in la dareemo qanaaco, xasilooni, iyo in aan laga welwelin in qofna uusan jirkaaga dhaawacayn, uusan waxyeelaynayn dareenkaaga, ama uusan waxyeelaynayn hantidaada.

Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsana hay	Aad ayaan ugu raacsana hay	Kuma habboona
a. Canuggaygu ammaan ayuu ku dareemaa dugsiga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Canuggaygu wuxuu dareemaa ammaan marka uu dugsiga aadayo iyo markuu ka imaanayo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Cunuggaygu wuxuu ku dareemaa ammaan fasalka dhexdiisa.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Canuggaygu wuxuu ammaan ku dareemaa qaybaha kale ee dugsiga (sida, goobta jirdhiska, maqaaxida, suuliga, hoolalka la maro, qolalka dhar badalashada).	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
e. Canuggaygu wuxuu ku dareemayaa ammaan bannaanka dugsiga (tusaale ahaan, barxadda dugsiga, baarkinka iskuulka).	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
f. Ilmahaygu wuxuu ku dareemaa ammaan baska iskuulka.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>



**Ammaan: Hagardaamada**

Q18 *Hagardaamadu* waa marka qofku isku dayo inuu waxyeeleeyo qof kale si kas ah, oo tanina sameeyo in kabadan hal mar. Waxay noqon kartaa mid jireed, mid afka ah, ama mid bulsheed, waxayna sidoo kale ka dhici kartaa internetka iyadoo la adeegsanayo iimayl ama farriimo qoraal ah. Qofka hagardaamada samaynaya wuxuu inta badan haystaa *awood dhab ah ama uu iska dhaadhicayay* (sida, in uu ka awood badan yahay ama ka caansan yahay). Mararka qaar koox ardayda ah ayaa hagardaamaysa ardayda kale. Hagardaamadu MA AHAN marka ardayda isku awoodda ah ama isku meeqaamka ah ay is diriraan ama ay murmaan.

4tii todobaad ee lasoo dhaafay, ilaa intee ayuu canuggaagu la kulmay waxyaabaha soo socda:

	Marna ba	Wax ka yar hal mar bishii	Hal mar ama laba jeer bishii	Hal mar todoba adkii	Dhowr jeer todoba adkii	Maalin walba	Ma hubo
a. Canuggayga waa la hagardaameeyay iyadoo waxyeelooyin jirka ah lasoo gaarsiiyay (sida, in si ku celcelis ah loo garaacay, loo laaday, loo riixay ama loo turaantureeyay, alaabtiisii ayaa laga qaatay ama laga jajabiyay) ama waxaa loogu hanjabay waxyeelo jirka ah la gaarsiin doono.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Canuggayga af ahaan ayaa loo hagardaameeyay (sida, in si ku celcelis ah loo caayay, magacyo loogu bixiyay, loogu kaftamay, hoos loogu dhigay, loo aflagaadeeyay, ama loogu cagajugleeyay).	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Canuggayga si bulsho ahaan ah ayaa loo hagardaameeyay (sida, in si ku celcelis ah loo inkiray, si ulakac ah loo faquuqay, warar been ah laga faafiyay, ama in dad kale isku dayeen in ay bahdilaan ama uu u muuqdo mid xun).	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Canuggayga internetka ayaa laga hagardaameeyay (sida, in la caayay, magacyo loo bixiyay, loo cagajugleeyay, ama la bahdilay iyadoo la isticmaalayo sawiraan, fariin qoraaleedyo, iimaylo ama baraha bulshada).	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Ammaan: Xadgudubka Galmada**

\*Su'aashaan waxaa kaliya loogu tala galay walidiinta/daryeel bixiyeyaasha ardayda dhigata Fasalka 7 ilaa 12.

Q19 *Xadgudubka galmadu* wuxuu ku lugleeyahay in qof loo taabto qaab galmo ah, in qof laga faafiyo warar been abuur ah oo ku saabsan galmo, in faalooyin ama kaftan galmo ku saabsan laga sameeyo qofka jirkiisa, ama laga bixiyo tilmaamo galmo oo uusan qofku raali ka ahayn.

4tii todobaad ee lasoo dhaafay, majirtaa in canuggaaga galmo ahaan loogu hagar daameeyay dugsiga?

- Maya
- Haa
- Ma hubo

**Ammaan: Fikrad khaldan ka bixinta, Iska necbaanshiyaha iyo/ama Takoorka**

Q20 *Fikrad khaldan ka bixintu* waa marka qofku kasoo qaado in koox dad ah oo wadaaga dabecado gaar ah ay sidoo kale wadaagaan sifooyin gaar ah (sida, marka qofku uu wax ka malaysto qof asaga oo ku salaynaya qayb kamid ah aqoonsigiisa).

*Iska necbaanshuhu* waa marka qofku aaminsan yahay (sida caadiga ah mid xun) oo ku saabsan qofka ama koox asaga oo ku salaynaya fikrad khaldan oo uu ka aaminsan yahay.

*Takoorku* waa marka qofku ku koco *dhaqamo ku salaysan waxyaabaha uu aaminsan yahay*. Takoorku waa dhaqan aan cadaalad ahayn oo lagula dhaqmo qof gaar ah ama koox dad ah. Sida caadiga ah ula dhaqanka si gaar ah waxaa lagu saleeyaa qofka jinsigiisa, diintiisa, waddanka uu kasoo jeedo, isirkiisa (dhaqankiisa) qoladiisa, ama sifooyinka kale ee qofka. Takoorka isirka ku salaysan waa in qof la faquuqo ayada oo lagu salaynayo qoladiisa iyo in loola dhaqmo si gaar ayada oo loo sababaynayo qoladiisa.

Canuggaagu ma waajahay fikrad khaldan ka qabista, iska necbaanshiyaha, ama takoorka asaga oo dugsiga jooga sannadkaan?

- Maya
- Haa
- Ma hubo

Q21 Haddii aad **Haa** kaga jawaabtay, fadlan caddee sababta. *Dooro dhammaan kuwa ku habboon.*

- Muuqaalka canuggaaga
- Labiska canuggaaga
- Naafanimo canuggaagu qabo
- Isirka iyo qolada canuggaaga
- Heerka dakhliga qoyskaaga
- Qaabka qoyskaaga
- Asalkaaga luuqadeed (sida, luuqadda koowaad ee canuggaaga)
- Jinsiga ama aqoonsiga jinsiga canuggaaga
- Darajooyinka ama heerka guusha canuggaaga (haddii ay sarreeyaan iyo haddii ay hooseeyaanba)
- Aqooniga Asalka ah ee canuggaaga (sida.. First Nations, Métis, Inuit)
- Qolada canuggaaga
- Diinta ama caqiidada qoyskaaga
- Rabitaanka galmo ee canuggaaga **\*Waalidiinta/daryeel bixiyeyaasha ardayda dhigata Fasalada 7 ilaa 12 oo kaliya.**
- Sabab kale oo aan qornayn \_\_\_\_\_

Q22 Ma u malaynaysaa in dugsiga canuggaagu si wax ku ool ah wax uga qabto dhacdooyinka hagardaamada ah?

- Haa
- Xoogaa
- Maya
- Ma hubo

Q23 Ma u malaynaysaa in dugsiga canuggaagu si wax ku ool ah wax uga qabto dhacdooyinka xadgudubyada galmada ah?

- Haa
- Xoogaa
- Maya
- Ma hubo

Q24 Ma u malaynaysaa in dugsiga canuggaagu wax ka qabto cunsurinimada iyo qaababka kale ee takoorka ah (ee ku salaysan jinsi, awood, iwm) si wax ku ool ah deegaanka dugsiga dhexdiisa?

- Haa
- Xoogaa
- Maya
- Ma hubo

**Bad-qabka: Badqabka Guud**

Q25 Guud ahaan, maxaad ku qeexi lahayd badqabka canuggaaga?

- Aad u heer sarraysa
- Aad u fiican
- Fiican
- Dhexdhexaad ah
- Liidata
- Ma hubo

**Bad-qabka: Xirfadaha Dugsiga iyo Bulshada**

Q26 *Xirfadaha dareenka iyo kuwa bulshada* waxay la xiriirtaa qaabka dadku u maareeyaan dareenkooda, sida ay nafhooda u arkaan, ulana falgalaan dadka kale.

Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeeda	Waan kasoo horjeeda	Mana kasoo horjeedo o kumana raacsani	Waan ku raacsan ahay	Aad ayaan ugu raacsan ahay
a. Canuggaygu wuxuu awood u leeyahay in uu wax ka qabto caqabadaha lama filaanka ah.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Canuggaygu wuxuu awood u leeyahay in uu la tacaalo dhibaatooyinka adag.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Canuggaygu waa uu yaqaanaa waxa uu ku xunyahay iyo waxa uu ku wanaagsan yahay (sida, awoodiisa iyo baahiyihiisa).	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Canuggaygu waa uu qeexi karaa dareenkiisa inta badan.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
e. Canuggaygu waa uu yaqaanaa waxa ka farxiya iyo waxa aan ka farxinin.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
f. Canuggaygu waa uu xakamayn karaa qaabka uu u dhaqmo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
g. Canuggaygu waa uu fakaraa kahor inta uusan tallaabo qaadin.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
h. Canuggaygu waa uu xakamayn karaa dareenkiisa iyo fakarkiisaba.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
i. Canuggaygu wuxuu ku wanaagsan yahay in uu waxa wanaagsan ka doorto waxa xun.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
j. Canuggaygu wuxuu qaataa go'aanno wanaagsan.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
k. Canuggaygu waa uu ka fakaraa waxyaabaha ka dhalanaya waxa uu samaynayo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
l. Canuggaygu waa uu yaqaanaa qaabka loo dhaqmo marka la joogo xaaladaha bulsho ee kala duwan.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
m. Canuggaygu wuxuu ixtiraamaa afkaarta dadka kale.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
n. Canuggaygu wuxuu isku dayaa in uu fahmo qaabka dadka kale wax u arkaan waxna u dareemaan.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
o. Canuggaygu wuxuu dadka kale kula dhaqmaa xushmad.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
p. Canuggaygu waa uu u naxariistaa dadka kale.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
q. Canuggaygu wuxuu caawiyaa dadka kale (ee murugaysan, waxyeeloobay, ama kaliga ah).	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

Q27 Su'aalaha ku jira qaybta soo socota waxay ku saabsanyihiin adiga ama waxyaabaha qoyskaagu kala kulmo dugsiga.

**Ka qaybgalka: Kaalmada Dugsiga Ka baxsan**

Q28 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Waxaan canuggayga ku dhiirigaliyaa in uu dugsiga shaqo wanaagsan ka qabto.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Waxaan canuggayga kala hadlaa sida ay dugsiga ku yihiin ama caqabadaha uu waajaho.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Ka qaybgalka: Xiriirka ka Dhexeeya Waalidka/Daryeel bixiyaha iyo Macalimiinta**

Q29 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Macalimiinta dugsigaygu waxay dhagaystaan welwel kasta oo aan ka qabo canuggayga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Macalimiinta canuggaygu waxay iila dhaqmaan si sharaf iyo ixtiraam leh.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Macalimiinta canuggaygu waxay si dhow iigala shaqeeyaan in aan canuggayga caawiyo marka uu dhibaatooyin qabo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Waxaan si wanaagsan uga warhayaa horumarka dhanka waxbarashada ee canuggayga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Ka qaybgalka: Ku luglahaanshaha/Ka qaybgalka Waalidka**

Q30 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Dugsiga canuggaygu wuxuu leeyahay qaabab badan oo kala duwan oo aan uga qaybqaadan karo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Dugsiga canuggaygu wuxuu isku dayaa in xubnaha qoysku ka qaybqaataan waxqabadyada dugsiga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Waxqabadyada waalidka/daryeel bixiyaha waxaa la qabtaa wakhtiyo aan xaadiri karo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Deegaanka: Deegaanka Dugsiga**

Q31 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Canuggaygu wuxuu jecelyahay in uu dugsiga joogo.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Dugsiga canuggaygu waa goob soo dhaweyn iyo saaxiibtinimo leh.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Dugsiga canuggaygu waa goob taageero laga helo dadkana soo jiidanaysa.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Dugsiganu wuxuu iila dhaqmaa qaab i dareensiiya in la i ixtiraamayo (la isoo dhaweynayo, la i qiimaynayo, la ina daryeelayo).	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Deegaanka: Xidhiidhka**

Q32 Fadlan muuji ilaa heerka aad ku raacsantahay ama kasoo horjeedo odhaahaydan soo socda:

	Aad ayaan uga soo horjeedaa	Waan kasoo horjeedaa	Mana kasoo horjeedo kumana raacsani	Waan ku raacsanah ay	Aad ayaan ugu raacsanah ay
a. Macluumaadka qoraalka ah ee dugsigu ka yimaada waa mid ku qoran luuqad la fahmi karo oo fudud.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
b. Waxaan awoodaa in aan la kulmo xubnaha shaqaalaha si aan ugala hadlo fikradaha iyo arrimaha muhiimka noo ah annaga iyo caruurteenna.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
c. Waxaan si wanaagsan uga war qabaa waxqabadyada dugsigu iyo fursadaha si aan uga qaybqaato.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
d. Waxaan ku qanacsanahay xiriirka na dhexmara dugsigu canugga.	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

Q33 Waxaan jeclaan lahayn in aan wax badan ka ogaanno adiga iyo canuggaaga. Jawaabahaaga LOOMA isticmaali doono in lagu aqoonsado midkiinna maadaama xog ururintu tahay mid qarsoodi ah natiijada kasoo baxda oo lasoo koobayna waa laydinla wadaagi doonaa. Macluumaadku wuxuu naga caawin doonaa in aanu u shaqayno adiga, canuggaaga iyo ardayda kale iyo qoysaska si wanaagsan.

**Aqoonsiga Jinsiga**

Q34 *Aqoonsiga Jinsigu* waa waaya aragnimada hoose ee qof walba uu u leeyahay jinsiga. Waa dareenkooda dumar ahaan, nin ahaan, labadoodaba, midkoodna, ama wax kamid ah dayrka jinsiga. Aqoonsiga jinsiga qofku wuxuu noqon karaa isla kii qofku ku dhashay ama mid ka duwan.

	Waxyaabaha soo socda keebaa sida ugu wanaagsan u qeexaya sida CANUGGAAGU isu arko?	Waxyaabaha soo socda keebaa sida ugu wanaagsan u qeexaya sida AAD isu aragto?
Lab	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Dheddig	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Si kale isu qeex	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Doorbidaya inaanu ka jawaabin	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Ma hubo	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>



**Aqoonsiga Asalka ah**

Q35 dadka Asalka ah ee ku sugan Ontario, waxaa kamid ah kuwa dhalashada haysta (status) iyo kuwo kaleba (non-status), dadyowga First Nations, Métis iyo Inui.

	CANUGGAAGU ma isu arkaa qof Asal ah (First Nations, Métis, iyo/ama Inuit)?	MA isu aragtaa qof Asal ah (First Nations, Métis, iyo/ama Inuit)?
Maya	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Haa	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Doorbidaya inaanu ka jawaabin	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Ma hubo	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

Q36 Haddii aad **Haa** uga jawaabtbay, waxyaabaha soo socda kuweebaad adiga iyo/ama canuggaagu isu aragaan? *Dooro dhammaan kuwa ku habboon.*

	Canugga	Waalidka/Daryeel bixiyaha
First Nations	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Métis	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Inuit	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

**Aqooniga LGBTQ2S+**

Q37 LGBTQ2S+ waxaa loola jeedaa dumarka isguursada, ragga isguursada, labeebka, qofka jinsigiisa badala, laba ruux leh, aan la aqoon, su'aal kajirto, iyo sidoo kale aqoonsiyada kale ee kujira bulshada LGBTQ2S+.

	CANUGGAAGU ma ku tilmaamanyahay LGBTQ2S+? <i>*Su'aashaan waxaa kaliya loogu tala galay ardayda dhigata Fasalada 4 ilaa 12.</i>	ADIGU ma isu aragtaa LGBTQ2S+?
Maya	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Haa	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Doorbidaya inaanu ka jawaabin	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Ma hubo	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

## Jinsiyadda

Q38 Dadka waxaa badanaa lagu tilmaamaa inay ka mid yihiin "jinsiyado" gaar ah oo ku saleysan sida dadka kale u arkaan ama ay ula dhaqmaan. Fikradahan ku saabsan cidda aad jinsiyad ahaan ka tirsan tahay waxay badanaa ku saleysan yihiin astaamaha jirka sida midabka maqaarka. Fikradaha ku saabsan isirka waxaa badanaa lagu suntaa dadyow iyadoo ay saameyn ku yeelan karaan waaya-aragnimadooda nololeed iyo sida loola dhaqmayo. Jinsiyada ayaa badanaa lagu khaldaa qowmiyadaha, laakiin inta badan waxaa jiri karta dhowr qowmiyadood gudahooda inay jiraan kooxo jinsiyadaha ah oo kala duwan. Bulshadeena dhexdeeda, dadku badanaa waxaa lagu qeexaa asalkooda ama muuqaalka asalkoodii hore.

	Koox jinsiyadee ah ayaa sida ugu wanaagsan u qeexaya CANUGGAAGA? Dooro dhammaan kuwa ku habboon.	Koox jinsiyadee ah ayaa sida ugu wanaagsan kuu qeexaysa ADIGA? Dooro dhammaan kuwa ku habboon.
Madow (tusaale, Afrikaan, Afraan-Kareebiyaan, Afrikaan-Kanadiyaan ka soo jeeda)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Aasiyada Bari (tusaale, Jayniis, Kuuriyaan, Jabbaaniis, Taywaaniis ka soo jeeda)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Asalka (First Nations, Métis, faraca Inuit)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Latino / Latina / Latinx (Ameerikan Latin ah, Isbaanish laatiin ah)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Bariga Dhexe (Carab, Faarisi, Galbeedka Aasiya, tusaale ahaan Afgaanistaan, Masar, Iiraan, Lubnaan, Turki, Kurdi, iwm.)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Koonfurta Aasiya (Kasoo jeeda Koonfurta Aasiya, tusaale ahaan Bariga Indian, Bakistaan, Bangaladesh, Sri Lankan, Indo-Caribbean, iwm.)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Koonfur Bari Aasiya (Filibiin, Fiyatnaamiis, Kaamboodiya, Taayland, Indooniisiyaan, Qoomiyada kale ee Koonfur Bari Aasiya)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Caddaan (Reer Yurub)	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Koox Jinsiyeed oo aan la sheegin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Doorbidaya inaanu ka jawaabin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ma hubo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

**Naafonimada**

Q39 Dadka qaar waxay u aqoonsadaan inay leeyihiin naafo sababta oo ah xaalad caafimaad oo joogto ah ama mid muddo-dheer haysay, taasoo ku adkeynaysa iyaga inay ku shaqeeyaan deegaan aan si buuxda loogu wada dhammayn loona wada heli karo. Naafada qofka waa la oqoonsan karaa ama lama oqoonsan karo. Waxay noqon kartaa mid qarsoon ama mid la arki karo. Ardayda qaar ee curyaamiinta ah waxay lahaan karaan qorshe gaar ah oo dugsiga ku caawiya (Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyeed ama IEP), laakiin qaarna malaha.

	CANUGGAAGU naafanimo ma qabaa?	ADIGU naafanimo ma qabtaa?
Maya	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Haa	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Doorbidaya inaanu ka jawaabin	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Ma hubo	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

Q40 Haddii aad **Haa** kaga jawaabtay in adiga ama canuggaagu aad naafanimo qabtaan (ama naafooyin):

	Fadlan dooro dhammaan waxyaabaha ku habboon CANUGGAAGA.	Fadlan dooro dhammaan waxyaabaha kugu habboon ADIGA.
Balwada	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Cudurka Xanuunka Ootiisamka (ASD)	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Indho la'aan ama aragtida oo daciifa	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Xanuun joogto ah	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Dhegoole ama maqalka oo adkaada	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Naafonimada dhanka koritaanka ah	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Naafonimada dhanka wax-barashada ah	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Naafonimada dhanka maskaxda ah	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Dhaqdhaqaaqa	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Naafanimo lixaadka ah	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Naafonimada hadalka	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
Naafanimo aan kor ku qornayn	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>

**Diinta, Kooxda ama Caqiidad uu ka Tirsanyahay**

Q41 Dadka waxaa loola dhaqmi karaa si kala duwan iyadoo lagu saleynayo diintooda, ama diin wax u eeg, taas oo u horseedi karta saameyn xun iyo natiijooyin aan sinneyn. Islaam nacaybka iyo nacaybka yahuuddu waa tusaalooyinka habka diinta wax loogu takoori karo. Dadku waxay la kulmi karaan cunsuriyad kaliya ku saleysan midabka maqaarka laakiin sidoo kale waxaa jiri karta sifooyin kale oo diinta la xidhiidha.

	Waa maxay diinta CANUGGAAGA, caqiidada iyo/ama ku xidhnaanshaha ruuxiga ah (spiritual affiliation)? Dooro dhammaan kuwa ku habboon.	Waa maxay DIINTAADU, caqiidadaada iyo/ama ku xirnaanshahaaga diinta (spiritual affiliation)? Dooro dhammaan kuwa ku habboon.
Agnostic	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Diin laawe	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Buudhist	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Kiristan	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Hindu	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Diinta dadka asalka ah	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Yuhuudi	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Muslim	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Siikh	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ruuxi, laakiin aan diin lahayn	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Wax diin ah ama Xidhiidh ruuxi ah ma lihi	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Dimaha ama xiriirka caqiidada aan kor ku qornayn	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Doorbidaya inaanu ka jawaabin	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>
Ma hubo	<input type="checkbox"/>	<input type="checkbox"/>

Q42 Fadlan ka jawaab su'aalaha soo socda si aad noogu sheegto waxyaabaha ku saabsan waaya aragnimadaada, fikikaaga iyo aragtidaada ku saabsan dugsiga canuggaaga. Faalooyinkaagaa looma aqoonsan doono in ay yihiin kuwo aad adigu leedahay, maadaama aan magacaaga (ama magaca canuggaaga) ama macluumaad kale oo idin tilmaamaya lagu soo dari doonin.

Q43 Fadlan wax nooga sheeg qaar kamid ah waxyaabaha aad ku jeceshahay dugsiga canuggaaga.

---

---

---

---

---

---

---

---

Q44 Fadlan noo sheeg waxyaabo ku saabsan qaar kamid ah waxyaabaha sii hagaajin kara dugsiga canuggaaga.

---

---

---

---

---

---

---

---

**Waad ku mahadsan tahay buuxinta xog ururintaan!**